# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOGOSHA WADATASHIGA QARAN

## WAR-MURTIYEED

**16-19 Juun, 2025**

**MUQDISHO, SOOMAALIYA**

**HORDHAC**

Iyadoo laga ambaqaadayo ku dhawaaqistii Madaxweynaha JFS 29 Maarso 2025 ee Gogosha Wadatashiga Qaran iyo kulamadii hordhaca u ahaa ee lala yeeshay siyaasiinta iyo hoggaamiyeyaasha qaybaha bulshada, ayaa waxaa si rasmi ah Muqdisho uga furmay Gogosha Wadatashiga Qaran. Madaxweynaha JFS Mudane Dr Xasan Sheekh Maxamuud oo si rasmi ah u furay gogosha, ayaa hadal-jeediintiisii gogosho ku cadeeyay inay gogoshani sii furnaan doonto, adkeeyayna in aanay jirin cid laga tagi doono.

Kulanka oo socday 16 illaa 19 Juun 2025, ayaa waxaa ka qaybgaley Madaxda Dawladda Federaalka Soomaaliya, siyaasiin iyo hoggaamiyeyaasha qaybaha bulshada sida; madax hore, ururrada siyaasadda Soomaaliya ee diiwaangashan, Xisbiyada siyaasadda Puntland, Culimada iyo Bulshada Rayidka ee Soomaaliyeed.

Gogoshu muddadii afarta maalmood ee ay socotay waxaa ay ka-qaybgalayaasha uga wadahadleen ajandayaal muhiim u ah dhamaystirka geeddi-socodka dawlad dhiska Soomaaliya oo ay ku jiraan midnimada iyo dhab-u-heshiisiinta dalka, amniga iyo ciribtirka argagixisada, dhamaystirka dastuurka iyo dimuqraadiyaynta iyo doorashooyinka.

**QODOBADA KA SOO BAXAY SHIRKA**

## Midnimada Dalka

- Gogoshu waxaa ay hoosta ka xariiqday in ilaalinta iyo xoojinta midnimda iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed ay tahay lama-taabtaan.
- Gogoshu waxay ku baaqayday in dib loo bilaabo wadahaladii u dhaxeeyay Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka Somaliland, si xal-waara looga gaaro midnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed, waxaana hoosta laga xariiqay in loo midoobo meelna looga soo wadajeesto isku-day kasta oo faragelin shisheeye ee dalka lagu kala qaybinayo.

## Amniga iyo Ciribtirka Argagixisada

- Gogoshu waxay si qoto dheer u dul istaagtay, una qirtay guulaha ciidanka qalabka sida iyo xooggaga difaaca dadweynaha oo kaashanaya bulshada Soomaaliyeed ay ka gaareen ladagaallanka Argagixisada Al-Shabaab iyo Daacish gaar ahaan deegaanada Calmiskaad ee Puntland iyo deegaanada kaleba.

- Gogoshu waxay hoosta ka xariiqday in fikirka argagaxisnimada iyo khawaarijnimada ku dhisan uu yahay khatarta koowaad ee dawladnimadeena hortaagan loona baahan yahay in ummadda Soomaaliyeed ay u midowdo ladagaallankooda, iyadoo la garab istaagayo ciidamada qaranka iyo xooggaga difaaca dadweynaha.

## Dhamaystirka Dastuurka

- Gogoshu waxaa ay garowsatay in dastuurku uu yahay dukuminti nool mar walbana u furan in wax-kabedel lagu sameeyo.
- Gogoshu waxay ku talisay in afarta cutub ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ansixiyay iyo cutubyada kale ee aan weli la ansixinin ay siyaasiinta Soomaaliyeed wixii aragti ah ay ka qabaan laga wadahadlo, iyadoo loo marayo habraaca dastuurku uu tilmaamayo.
- Iyadoo la ilaalinayo mabaadii'da guud ee aas-aasiga ah ee Soomaalida heshiiska ku tahay, gogoshu waxaa ay adkaysay in dhamaystirka dastuurku yahay waajib iyo ahmiyad qaran.
- Gogoshu waxay ku talisay in wadahadal lagu dhameystiro heshiisyada iyo xeerarka gun-dhigga u ah federaalaynta dalka ee dastuurka.

## Dimuqraadiyaynta iyo Doorashooyinka

- Gogoshu waxay isla qaadatay in doorasho dadban nooc kasta oo ay tahay aan dib loogu noqon.
- Iyadoo laga ambaqaadayo khibradaha dhanka dimuqraadiyaynta iyo doorashooyinka ee maamulada Somaliland iyo Puntland, gogoshu waxaa ay hoosta ka xariiqday in si deg deg ah loo qabto doorashada dawladaha hoose ee deegaanada kale ee dalka, si geeddi-socodka doorashooyinka dalka uu isu soo gaaro.
- Si loo ilaaliyo xasilloonida siyaasadeed ee dalka, gogoshu waxay dhiirigelisay inay sii socdaan wadahadalada heshiis dhamaystiran oo loo dhan yahay looga gaarayo doorashooyinka labada heer ee dawlad goboleedyada iyo dawladda Federaalka (Baarlamaanka iyo Madaxweynaha).

## Baaq iyo Bogaadin

- Kulanku wuxuu bogaadi`yay gogoshan uu fidiyay Madaxweynaha JFS kuna baaqay inuu sii socodo, iyadoo loogu baaqayo siyaasiinta iyo waxgaradka kale inay ka qaybgalaan soona ajiibaan.

- Geeddi-socodka wadahadalada lagu dhamaystirayo ajandayaasha qaran waa inay noqdaan kuwo Soomaaliyeed oo Soomaalidu leedahay, dadkeena iyo dalkeenana u horseedaya degannaansho, nabad iyo horumar waara, kana maran faragelin shisheeye.
- Gogoshu waxay ugu baaqday culimaa'udiinka, madax-dhaqameedyada, bulshada rayidka iyo waxgaradka kale ee Soomaaliyeed inay ka qaybqaataan wacyigelinta, isu soo dhowaynta iyo xal u helidda arrimaha siyaasadeed ee lagu kala ra'yi duwan yahay.
- Gogoshu waxay ugu baaqday in kala ra'yi duwanaanshaha siyaasadeed aanay saameyn xun ku yeelan gargaarka bani'aadamnimada iyo mashaariicda horumarineed ee deegaanada bulshada Soomaaliyeed.

**DHAMMAAD**